

2023-11-01

Dhaqtar Horton Column

## **DCSD waxay Diirada Saartaa Dhisida Buundooyin, Ma ahan Darbiyo**

Ardayda, Qoysaska, iyo Jaalalka Bulshada ee Qaaliga ah,

Meesha Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb (DCSD), waxaan si sharaf leh u qaabilnaa kala duwanaanshaha oo waxaan u dabaaldagnaa taariiqsheena gaarka ah iyo dhaqanada. Waxaan daacad u nahay kobcinta nidaamka waxbarashada halkaasoo badqanka, ixtiraamka, iyo midnimada lagu dhiirogeliyo laguna taageero. Sababtaas darteed, horyaalada DCSD inaan dhalaalineyno dhari dhaqamo ah meeshaasoo in ka badan 140 luuqadood looga hadlo oo matasho in ka badan 180 wadan oo 138 dugsiyadeena iyo xarumaheena oo dhan. Waa mudnaanta degmadeena iyo waajibaadka lagu kobcinayo jawiyo soo dhaweyyo, sare u qaado, oo illaaliyo shaqsi walba oo ku socdo albaabadeena.

Qaabilaadaan kala duwanaanshaha, DCSD waxay si ku faanid leh u xaqijineysaa ka go'naanteeda ay ku bixinayaan jawiyada waxbarashada loo dhanyahay. Bartamaha howlgalkeena waa Qaabdhismeedka Wanaajinta Joogtada ah ee MIRACLES, taasoo balan qaado sinnaan, fursad, iyo hormarinta filashada ardayda. Howlgalkaan waxaa hago mabaadi'da H-PRIDE (Bani'aadinnimo, Xirfadlenimo, Ixtiraam, Daacadnimo, Sharaf, iyo Naxariis) oo u adeegto sida jaangoynteeena safarka ku aadan sinnaanta waxbarashada iyo guusha shaqsiga oo CANUG walba.

Waxa dhaafsan qaabdhismeedyada iyo mabaadi'da, doorarkeena machadka waxbarashada wuxuu dhaafsiisanyahay tacliinta oo waxaa ka mid ah ku dhiirogelinta qiyamyada fahamka, aqbalida, iyo midnimada kala duwanaanshaha. Xubin walboo bulshada ah waxay u qalantaa inay dareemaan in la qiimeeyo, la ixtiraamo, oo waxaa ka sareeyo oo dhan- badqabka.

Xubnaha bulshada iyo dadka kale ayaa igala soo xiriiray booska DCSD ee la xiriiro dhacdooyinka dhawaan ee Bariga Dhexe. Booskeena wuu fududyahay: Waxaan si adag uga soo horjeednaa nooc walba oo takoorid, xadgudub iyo kala qeybinta ka dhanka ah qof walba.

Sida aan ku tilmaamay bisha la soo dhaafay Wargadeyda Qoyska ee La xiriirtay Bariga Dhexe, DCSD waxay qaaday tallaabooyin xoogan oo lagu xoojinayo badqabka bulshada dugsigeena. Laga bilaabo Saraakiisha Booliska DCSD illaa maamulayaasha iyo xubnaha shaqaalah, waxaan dhammaanteen ka mideysannahay inaan ka firfircoonaano, ka taxadarno, oo aanan ka gaban tallaabooyinkeena amniga. Halisa walboo imaan karo ama dhacdooyin ee ku xiran dhacdooyinkaan waxaa si adag oo degdeg ah wax uga qabanayo shaqaalaheena ay ka go'antayah.

Si kastaba, badqabka waa iskaashi. Waxaan mar kale ka codsaneynaa qof walba inuu nagula soo biiro dadaalkaan. Ollalaheena "*See Something, Say Something*" ma ahan kaliya jumlad—waxaa loo yaqaan facil. Haddii aad adiga ama canugaaga ogaataan halis walboo imaan karta, dhibaato malahan meesha ay ka soo baxeyso, waxaan aaminsannahay inaad si degdega ah ula soo xiriireysid shaqaalaheena.

Iyadoon laga eegin dhacdooyinka caalamka ee maanta, ka go'naanta Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb wuxuu ahaanayaan dhinacyada hubinta mustaqbal meeshaasoo shaqsiyaadka loola dhaqmo sinnaan iyo dulqaad naxariis, iyadoon laga eegin asalkooda ama aaminsanaantooda. Muhiimadeeda, waxaan aaminsannahay inaan ka shaqeeyn karno inaan abuurno barito caalam ka dulqaad badan, loo dhan yahay, oo badqab ah iyadoo loo marayo ardaydeena maanta.